



Axsan tiixraac

Walidiintow ixtaraf leh,

marka dugsiga la taga'yo wa in la tiixraaca sharuudahan.

Sharudaha waxay ku qoron tahay qaanuunyada cusub ee degmada Kreis Bergstraße ee taariikhda 01.04.2021 iyo qaanuunyada gobolada (waxaana loo yaqaana qaanuunyada haayadaha iyo qaanuunyada karantiinada).

Caruurta hadii calamadaha jirada lagu arko looma ogola iney dugsiga ama meeshay tobobar shaqeed ka wadan tagaan. Markey calaamdaha jirada ka baaba'een uun ayay halkaa tegi karaan.

Calaamdaha jirada waxay noqon karaan xumad, qufac qalalan, dhadhanka oo la beelay, ursadkii la beelay.

Haday dadka kale oo caruurta la nool calamadaha jirada yeeshaan, markaaba caruurta looma ogolo inay skuul ama meesha tobabarka shakeed laga wado tagaan. Waana ilaa intay dadka ee la nooshahay calamadaha jirada weli ka baabi'in.

Weliba haday ruux oo carrurta la nool baadhitaanka bositiiif ku noqotay Coronavirus- SARS-CoV-2 (Antigen-baadhitaan dhakhso ah uu qofka isku sameen karo) caruurta looma ogolo inay skuul ama meesha tobabarka shakeed laga wado tagaan. Markuu qofkii jiranaa baadhitaanka negatiif ku noqdo uun ayay caruurta meelaha tegi karaan.

Hadii uu qof oo caruurta la nool baadhitaanka PCR bositiiif ku noqdo wa iney dadka halkaa isla wada nool islamarkii karantiine galaan. Waana isla sidaa sidii la yeelaa haday caruurta baadhitaanka PCR bositiiif ku noqotay. Karantiinada waxay tahay inaad guriga joogtid oo ka bixi kartid uun mar aad dhakhtar u tagaysid ama baadhitaan corona soo samayn rabtid. Wakhtiga aad karantiina ku jirtid in lagu soo booqdo waa mamnuuc. Muddada ee tahay inaad guriga ku jirtid waa uga yaraan 14 maalmood ama ilaa wakhtiga ee haayadda caafimaadka kuu sheegtay.

Haday Ruux caruurta la nool karantiina ku jirto, carruurta skuulka ama dhismaha tobabarka shaqeed waxay tegi kartaa uun marka ee qofka wakhtiga karantiinada ka dhamaatay..

Hadaad adoo karantiina ku jirtid dhakhtar u baahatid waxaad wacdaa dhakhtarkaaga, dhakhtarka iyo xisbitaalada arimaha degdega ku saabsan markaa ugu horayn u sheeg inaad karantiina ku irtid.

Nabad wanaagsan

Haayaddaada caafiimaadka Gesundheitsamt des Kreises Bergstraße